

## Guudmarka

Barnaamijka Carruurta ee Caafimaad Ahaan Degdegga Ah ee Maamulka Naafonimada Koritaanka ee DSHS wuxuu adeeyo waajibaad kalkaalineed oo gaar ah siiyaa carruurta ay da'doodu tahay 17 iyo kuwa ka yar. Carruurta waxay leeyihiin baahiyo caafimaad oo adag kuwaas oo aan lagu maareyn karin baaxadda kalkaalinta aan joogtada ahayn. Adeegyada waajibaadka kalkaalineed ee gaarka ah waxaa lagu bixin karaa guriga qoyska, guriga korsashada ama guriga kooxda carruurta caafimaad ahaan nugul ee uu DDA qandaraaska siiyay.

## Miisaaniyad

DDA ma sameynayso miisaaniyadda heerkar faahfaahinta. Maamulka Daryeelka Caafimaadka wuxuu maareeyaa miisaaniyadda MICP.

## Qiimayaasha

Xog ka raadi [Hagaha Xayaysiinta Maamulka Daryeelka Caafimaad](#).

## Daneeyayaasha

- Macaamiisha adeegyada helaya iyo qoysaskooda.
- Waaxda Carruurta, Dhallinyarada iyo Qoysaska.
- Qaybta Adeegyada Guriga iyo Bulshada ee DSHS.
- Maamulka Daryeelka Caafimaadka ee Gobolka Washington.
- Adeeg-bixiyayaasha qandaraaska la siiyay:
  - Hay'adaha caafimaadka guriga.
  - Guryaha Kooxda Caafimaad Ahaan Nugul.
- Ururrada daryeelka la maareeyay.
- Isbitaallada.

## Awoodda

[WAC 182-551-3000](#) Waajibaadka kalkaalineed ee gaarka ah ee macaamiisha ay da'doodu tahay toddobo iyo toban iyo kuwa ka yar—Guud.



## La-socoshada

### Dibedda

- Xarumaha Adeegyada Medicare iyo Medicaid.
- Xafiiska Hantidhowraha Gobolka Washington.
- Waaxda Caafimaadka Gobolka Washington.
- Maamulka Daryeelka Caafimaad.

### Gudaha

- Xafiiska U-hoggaansamidda, Korjoogteynta iyo Tababbarka ee DDA.
- Xafiiska DDA ee Barnaamijyada Tayada leh iyo Ku Lug Lahaanshaha Daneeyaha.
- Xafiiska DDA ee Barnaamijka iyo Horumarinta Siyaasadda.

## Shuruudaha Xaq-u-yeelashada

Shakhsiyaadka:

- Ay da'doodu tahay 17 ama ka yar.
- Qaba baahiyo caafimaad oo adag (t.a., ku tiirsan qalabka neefsashada, ku tiirsan daloolka luqun-ka neefsiga, ama daaweynta baahiyo neefsasho adag).
- U baahan afar saacadood oo joogto ah ama in ka badan oo kalkaalin Xirfadeed firfircoon.
- Ku qoran Washington Apple Health oo hoos imaanaya baaxadda daryeelka qaybta baahan.